HealthPartners®

MACLUUMAADKAAGA.
XUQUUQDAADA.
WAAJIBAADKEENNA.

Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan
ee quseeya hay'adaha HealthPartners
ka tirsan.

Ogaysiiskaan waxa uu sharaxayaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu taxluqa loo isticmaalayo iyo loo siidaynayo iyo sida aad adiga ku heli kartid macluumaadkaan fadlan si fiican u akhriso.
Fadlan si fiican u aqriso.
Hirgalaysa Maajo 15, 2014

DULMARIDDA

Himiladeenna waxa ay tahay in la hormariyo caafimaadka iyo xaaladda lagu suganyahay ayadoo la kaashanayo xubnaheenna, bukaannadenna iyo jaalliyaddeena. Waxa aannu rabnaa in aad haysato taageerada daryeelka iyo si fiican ula socotid daryeelkaaga iyo caymiskaaga. Tan waxaa ka ku jira sharaxaadda sida loo isticmaalayo iyo loo maamulayo macluumaadkaaga, xuquuqdaada iyo dorashooyinkaaga ku aaddan macluumaadkaa.

Asturnaantu waa mowduuc ay adagtahay si lagu fahmo. Waxa aannu la soconnaa in lagu jaahwareeri karo, siiba marka ay meesha door ka qaadanayaan sharciyada gobolka iyo kuwa federaalka. Waxa aannu qaddarinaynaa kalsoonida aad na siisay marka aad noo xilsaartay daawayntaada, daryeelkaaga, iyo caymiskaaga. Waxa aannu rajaynaynaa in dulmarkaan xuquuqdaada iyo doorashooyinkaaga, iyo waajibaadka naga saaran sida loo isticmaalayo iyo loo wadaagayo macluumaadkaaga, ay kugu caawiso sida aannu sharciga u dhawrayno iyo sida aannu kalsoonidaada u qaddarinayno.

MACLUUMAADKAAGA

Ogaysiiskaan dhexdiisa, marka aannu isticmaalayno "maclumaadkaaga" waxa aannu ulajeednaa macluumaad adiga lagugu aqoonsanayo, in aad tahay xubin hadda ka tirsan ama ka tirsanaan jiray qorshaha caafimaadka, iyo ka hadlaya caafimaadkaaga ama xaaladdaada, adeegyada daryeelka caafimaadka, lacag-bixinnada, ama caymiska adeegyadaas ku baxaya. Waxaa ku jira macluumaadka kharashyada iyo caymiska, macluumaadka caafimaadka, sida jirrada ku haysa iyo adeegyada aad qaadatay. Waxaa ku jira macluumaadka shakhsiyeed sida magacaaga, cinwaankaaga, telefoonkaaga iyo taariikhda dhalashadaada.

XUQUUQDAADA BUKAAN AHAAN

Marka ay timaaddo macluumaadkaaga iyo asturnaanta, waxa aad leedahay xuquuq hoosimaanaya sharciga gobolka iyo federaalka. Qaybtaan waxa ay sharaxaysaa iyaga xuquuqdooda. Na weydii waxa ayaga ku taxluqa waxaana ku sharaxi doonna nidaamka, ay ku jirto haddii aad u baahantahay in aad codsigaaga ka dhigtid qoraal.

Waxa aad xaq u leedahay in aad:

Heshid koobiga macluumaadkaaga oo ah eletronig ama warqad ahaan

- Na weydisan kartid in aad eegtid ama qaadatid macluumaadkaaga oo ah si eletronig ama warqad ahaan.
- Waxa aannu ku siin doonnaa koobiga ama dulmaridda macluumaadkaaga sida ugu dhaqsiyo badan ee suurtagalka ah.
- Haddii ay jiraan xog aannu kula wadaagi karin ama xadayno helitaanka, waxa aannu kugu caawinaynaa in aad sababta fahamtid.

Na weydiiso in aannu macluumaadkaaga saxno

- Waxa aad na weydiin kartaa in aannu macluumaadkaaga saxno haddii aad noo sheegtid sababta uu qalad u yahay ama uusan u dhammaystirnayn.
- Waxa aannu codsigaaga oran karnaa "maya", balse waxa aannu kuu sheegi doonnaa sababta sida ugu dhaqsiyo badan ee suurtagalka ah. Sidaa awgeed, waxa aad na weydiin kartaa in aannu koobiga qilaafkaaga (qaraar qoraal ah ee aad noo soo gudbisay) ku darno xogtaada.

Na weydiiso in aannu xaddidno waxa aannu isticmaalno ama wadaagno

- Waxa aad na weydiisan kartaa in aannu isticmaalin ama wadaagin macluumaadkaaga. Markastaba waannu tixgelin doonnaa codsigaaga, balse waxaa dhici karta in aannu "maya" dhahno haddii taasi ay wax u dhimayso awoodda aannu adiga kugu siinayno

daryeelka ama adeegyada, ama haddii aannu awoodi karin in aannu wax ka baddalno nidaamkeenna.

- Haddii aad gebiahaamba bixisay qiimaha kharashka adeegyada ama sheyga, waxa aad na weydiisan kartaa marka aad timaadid bukaaneegtada in aanan macluumaadka ku taxluqa adeegyada ama sheyga in la wadaagin qorshahaaga caafimaadka. Codsigaaga waannu tixgalineynaa, waa haddii uusan sharciga na farayn in aannu macluumaadkaa la wadaagno qorshahaaga caafimaadka.

Codsashada xog-waraysiyada qarsoodiga ah

- Waxa aad na weydiisan kartaa in aannu kula soo xariirno si qaas ah (tusaale, lambarka guriga ama xafiiska) ama aannu iimeyl kuugu soo dirno cinwaan kale. Dadaal badan ayaan samaynaynaa si aannu danahaaga u qancinno.

Lagu siiyo qoraal taxana ah ee magacayada cidda la siiyay macluumaadkaaga

- Waxa aad na weydiisan kartaa qoraal taxana ah ("diiwaangelinta") xilliyada aannu macluumaadkaaga la wadaagnay hay'ado ama shakhsiyaad aanan xariir la-lahayn, cidda aannu la wadaagnay, iyo sababta.
- Waxa aannu soo raacinaynaa waqtiyada idil ee aannu maclumaadkaaga cid kale la wadaagnay, laga reebo marka ay ku taxluqdo caafimaadkaaga, lacag-bixinnada hawlaha daawayntaada ama daryeelka caafimaadka, iyo mararka qaarkood ee kale ee aannu siidaynay macluumaadkaaga (sida marka aad naga codsatay in aannu la wadaagno iyo siidaynno waxa ku taxluqa wax aannu horey kuugu sii sheegnay).

Lagu siiyo koobiga ogaysiiskaan

- Waxa aad codsan kartaa koobiga waraaqda ogaysiiskaan markasta ee aad doontid. Markiiba waa aannu ku siinaynaa.
- Ogaysiiskaan waxaa kale ee laga helaa healthpartners.com iyo parknicollet.com iyo lagu muujiyo goobaheenna idil ee daryeelka.

Dacwad ka xarayso haddii Asturnaanta xuquuqdaada la jabiyay

- Waxa aad si toos ah nooga soo dacwoon kartaa haddii aad dareentay in asturnaanta xuquuqdaada la jabiyay adiga oo isticmaalaya macluumaadka ku qoran bogga ugu dambeeya ee ogaysiiskaan.
- Waxaa kale ee aad dacwad kaga xaraysan kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka xafiiska Xuquuqda Madaniga (U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights). Ka raadso macluumaadka la xariiraka www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Wax tallaabo liddi adiga kugu ah kuma kacanayo marka aad dacwad samaysid.

DOORSHOOYINKAAGA

Xaaladaha qaarkood marka ay jiraan, waxa aad haysataa doorashooyin dheeraada ee ku taxluqa sida aannu u isticmaalayno iyo u wadaagayno macluumaadkaaga. Haddii xaaladaha hoos ku sharaxan wax ka doprbidayso, noo sheeg. Noo sheeg waxa aad rabtid in aannu sameynno, waxa aannu raacaynaa tusmooyinkaaga annaga oo sharciga raacayno.

Waxa aad noo sheegi kartaa in *aanan*:

- Macluumaadka la wadaagin qoyskaaga, saaxibaddaada, ama dad kale ee ka qaybgalaya daryeelkaaga ama bixinta daryeelkaaga.
- Kugu darno diiwaankeenna marka lagu soo seexiyo mid ka mida isbitaalladeenna.
- Kula soo xariirno si aad lacag ugu taageertid himiladeenna.
- Kula soo xariirno marka hawlaha aannu qabanno lacag u arruurineyno. (Waxa aannu weli macluumaadkaaga u isticmaali karaana cilmi-baaristeenna annaga oo markaa sharciga u marayno).

Waa in aannu helo oggolaashahaaga oo qoraal ah *kahor* inta aan:

- Macluumaadkaaga la isticmaalin ama lala wadaagin marka lagu xayeysiinayo hay'ad kale qalabkeeda ama adeegyadeeda.

- Maclumaadkaaga la isticmaalin ama lala wadaagin marka lagu xayeysiinayo hay'ad kale qalabyadeeda ama adeegyadeeda, haddii hay'ad kale ay lacagu nagu siinayso in aannu hawshaa u qabanno ama haddii qalabkeeda ama adeegyada aysan ahayn kuwo caafimaadka ku lug leh.
- Macluumaadkaa ka iibiino ama ka kiryesanno hay'ad kale.

WAAJIBAADKEENA

Waxa aannu ilaalinaynaa maclumaadkaaga sababtoo ah dhawrista asturnaantaada muhiim ayay noo tahay, iyo sababtoo ah sharcigaa sidaa ah.

- Waa in aannu waajibaadkeenna iyo dhacdoyinka asturan ee ogaysiiskaan lagu soo qoray.
- Waa in aannu ogaysiiskaan kugu siinno rugaha bukaannadeenna iyo interntka laga galayo healthpartners.com iyo parknicollet.com.
- Waxa aannu baddali karnaa ogasiiskaan, baddalaadyadana ku hirlgallinayanaa macluumaadka oo idil ee aannu kaa hayno. Haddii aannu baddalaadyo muuqda samaynno, waxa aannu oogaysiiska cusub dhejinaynaa rugaha daryeelka bukaannadeenna iyo internetka.
- Sida ugu dhaqsiyo badan ayaan kuugu soo sheegeynaa haddii la jabiyo (istcmaalka iyo wadaagga aan la oggolayn) taaso asturnaanta macluumaadkaaga halis galineysa.
- Ma aannu isticmaali doonno ama wadaagi doonno macluumaadkaaga siyaabo ka duwan sida ogaysiikaan lagu qoray, marka laga reebo in qoraal noogu sheegtid in aannu sidaa yeeli karno. Fikraddaada waa baddali kartaa marka aad doontid. Qoraal noogu so sheeg haddii aad fikraddaada baddalaysid.
- Marka uu sharciga sidaa nagu amrayo in aannu oggolashadaada oo qoraal ah helno kahor inta aannu isticmaalin ama wadaagin macluumaadkaaga, sidaa ayaannu yeeli doonaa.

- Waxa aannu ku weydiin doonnaa oggolashahaan marka aad bukaan noqotid iyo mararka qaarkood wixii intaa ka dambeya. Taani waxay noo furasayaa waddada aannu si fiican ugu maamulno daryeelkaaga, iyo hawlaheenna sida hoos ku xusan. Haddii aadan dooneyn in aad na siiso oggolaashahaaga, waxaa dhici karto in aannu awood u heli weyno in aannu adeegyadaada ugu qaanshegaanno qorshahaaga caafimaadka iyo markaa aannu adiga shakhsi ahaan kugu qaanshegaanno. Waxa kale ee dhici karta in aannu isuduwi karin adeegyada daryeelkaaga.

Caadi ahaan sideebaan u isticmaalnaa iyo u wadaagnaa macluumaadkaaga?

Caadi ahaan waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u wadaagnaa macluumaadkaaga siyaabaha soo socda:

Lagu daaweeyo (daawaynta)

Waxa aannu u isticmaalnaa iyo u wadaagnaa macluumadkaaga si lagugu daaweeyo. Waxa aannu la wadaageyna xirfadlyaasha iyo ururrada kale ee adiga ku daaweynaya ama daryeelkaaga maamulaya, iyo si laguugu dhiso daryeel ammaano iyo hufnaan meel loo raaco leh. Tan waxaa ku jira wadaagid ka dhaxaysa in la iskudubarido daryeel habaysan, sida isbitaalka dhakhaatiirtiissa iyo shaqaalihiisa ee wadajir uga wada shaqeeya si lagugu dareyeelo.

Tusaale: *Annaga oo ah rugta uu joogo dhaktarkaaga rasmiga ah, waxa aannu dhakhtarka taqasuuska qaaska leh ee ku daawaynaya waxa ay yihiin daawooyinka aad qaadatid, iyo lagaa dhawro iyo halista daawa isku milanta ka imaanaysa.*

Tusaale: *Waxa aannu ku xasuusinaynaa ballamada soo socda ee aad nala leedahay.*

Fadlan xasuuso in aannu u baahnayn oggolashahaaga si aannu macluumaadkaaga kuula wadaagno marka ay jirto xaalad degdeg ah haddii aadan adiga awoodin in oggolaasho bixiso sababo la xariira xaaladda aad ku sugantahay. Waxaa sii dheer, in hay'adaha ay quseyso

ogaysiiskan aanay u baahnayn oggolaashahaaga si ay dhexdooda macluumaadkaaga u wadaagaan, inta ay taasi ku socoto ujeeddo la oggolaaday.

Lagu qaansheegto adeegyadaada (lacag-bixinta)

Waxa aannu u isticmaali karnaa iyo wadaagi karnaa macluumaadkaaga si daryeelayaasha iyo kuwo kaleba loogu bixiyo kharashka daryeelka adiga lagu siinayo.

Tusaale: Haddii aannu u dirno macluumaadka ku taxluqa adeegyada aannu adiga ku siinno qorshaha caafimaadkaaga si ay markaasi ku bixiso adeegyadaas.

Tusaale: Waxa dhici karta in aannu la xariirno qorshaha caafimaadkaaga si aannu ku ogaanno haddii adeegyada ay leeyihiin caymis kahor inta aannu ku siin daryeelkaas.

Si lagu maamulo hay'addeenna (hawlaha daryeelka caafimaadka)

Waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u wadaagayna maclumaadkaaga si lagu hormariyo tayada daryeelkaaga iyo muddada joogitaankaaga, iyo si aannu ku maamulno hawalaheenna.

Tusaale: Waxa aannu macluumaadkaaga ku xadaynaynaa si lagugu caawiyo shahaadeynta iyo awood siinta, iyo qiimeynta tayada.

Tusaale: Waxa aannu maclumaadkaaga ku xadaynaynaa shuraakada meherada – kuwa nala shaqeeya ee adeegyada magaceenna ku bixinaya balse aannu ahayn shaqaalaheenna ama xiriiryaasheenna. Shuraakadaan waxa uu sharciga ku amrayaa in ay badbaadiyaan macluumaadkaaga isla sida aannu annaga sameyno.

Sidee kale ayaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadkaaga?

Waxaa naloo oggolyahay ama shardi nala kaga dhigay in aannu macluumaadkaaga u wadaagno siyaabooyin kale ee la xariira caafimaadka guud iyo hawlaha sharciga. Waa in aannu qancinno shuruudaha sharciga horyaalla kahor inta aannan macluumaadkaaga kugula wadaagi ujeeddooyinkaan.

Sharciga la raaco

- Waxa aannu u isticmaalnaa ama la wadaagnaa macluumaadkaaga haddii sharciga federaalka ama sharciga gobolka uu sidaa farayo.

Lagu caawiyo arrimaha caafimaadka guud iyo ammaanka

Waxa aannu ula wadaagnaa macluumaadkaaga hay'adaha sharciga guud iyo hay'ado kale ee loo fasaxay xaalado qaarkood sida:

- Kahortagga cudurdka
- Caawinta qalabka ama lagu bixiyay amar in la celiyo
- La soo sheego xasaasiyaadka ama fal-celiska qaadashada daawooyinka
- La soo sheego xadgudubka, dayaca, dagaalka guriga ama dembiyada rugaheenna daryeelka ka dhaca
- Laga hortago ama la yareeyo halista dhabta ah ee ka imaan karta qofka caafimaadkiisa ama ammaankiisa
- Lagu caawiyo nidaamka caafimaadka lagu kormeero, sida hantidhawrka ama baaritaannada
- La addeeco amarrada qaaska ee dawladda sida militariga, ammaanka qaranka, adeegyada badbaadada madaxweynaha iyo u siideynta rugaha asluubta

Laga jawaabo codsiyada deeqaha halbowlayaasha iyo xibanaha jirka

- Lagu isticmaalo iyo lagu wadaago macluumaadkaaga si lagu caawiyo deeqda halbowlaha ama xibnaha jirka.

Aannu la shaqeeyno baaraha caafimaadka ama maamulka rugta duugta

- Aannu la wadaagno macluumaadkaaga dhakhtarka baara geerida waxa sababay, baaraha caafimaadka, ama maamulaha rugta duugta.

La xalliyo shaqaalaha magdhawgiisa

- Waxa aannu u isticmaalaynaa iyo u wadaageynaa macluumaadkaaga dacwado u jeeda shaqaalahaaga magdhwgiisa.

Laga jawaabo dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga

- Waxa aannu u isticmaali karnaa iyo ula wadaagi karnaa maclumaadkgaa tallaabooyin sharciga quseeya, ama laga jawaabayo amar maxkamadeed ama maamul, ama hawlo kale ee sharciga salka ku haya.
- Waxa aannu u isticmaali karnaa iyo ula wadaagi karnaa saraakiisha adkaynta sharciga.

Marka la haysto qoraalka oggolaashahaaga

- Haddii aannu doonayno in aannu u isticmaalno ama wadaagno macluumaadkaaga siyaabo aan lagu qorin ogaysiiskaan, waxaa shrcdi nala kaga dhigay in aannu marka hore helno oggolaashahaaga oo qoraal ah.

WAXA MACLUUMAADKA QUSEEYA, SU'AALAHA AMA CABASHOOYINKA

Fadlan nagala soo hadal rugtaada daryeelka caafimaadka haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid ogaysiiskaan. Waxaa kale ee aad nagula soo xariiri kartaa telefoonka:

- HealthPartners Integrity iyo Compliance Hotline laga waco 1-866-444-3493 ama Khadka Degdegga Ah (Park Nicollet Hotline) ee laga waco 1-855-246-PNHS (7647)

Haddaba ma tahay bukaanka qorshe caafimaad ee HealthPartners?

Ka qaado macluumaadka ku taxluqa qorshaheenna caafimaadka dhacdoyinka asturan iyo xuquuqda asturnaanta xubnaheenna adiga oo HealthPartners Member Services ka waca **952-967-5000**, lambarka lacag-la'aanta ka waca **800-883-2177** ama **952-883-5127** (TTY). Waxaa kale ee aad macluumaadkaa ka heleysaa internetka laga galo **healthpartners.com**.

Ogaysiiskan quseeya ururradeenna iyo bixiyeyyaasheenna oo idil*:

- Amery Regional Medical Center and Clinics
- Capitol View Transitional Care Center
- Group Health Plan
- HealthPartners
- HealthPartners Central Minnesota Clinics
- HealthPartners Dental Group and Clinics (ay ku jiraan WOW Orthodontics, River Valley Dental Clinic iyo Stenberg Orthodontics)
- HealthPartners Hospice and Palliative Care
- HealthPartners Insurance Company
- HealthPartners Medical Group and Clinics
- Hudson Hospital & Clinics
- Integrated Home Care
- Lakeview Hospital
- North Suburban Family Physicians
- Park Nicollet Clinic
- Park Nicollet Health Care Products
- Park Nicollet Institute (ay ku jirto Xarunta Sokorowga Caalamaka)
- Park Nicollet Melrose Institute
- Park Nicollet Methodist Hospital
- Physicians Neck & Back Clinics
- Regions Hospital
- RHSC
- RiverWay Clinics
- Stillwater Medical Group and Clinics
- TRIA Orthopaedic Center
- virtuwell®
- Western Wisconsin Emergency Medical Services/ Unity Ambulance
- Westfields Hospital
- Shaqaalaha caafimaadka ee adeegyada ka bixiya urur kasta ee taxanahaan ku qoran
- Barnaamijyada hawlaha iyo adeegyada gaarahaaneed ay bixiyaan urur kasta ee taxanahaan ku qoran
- Daryeelayaasha iyo qandaraasleyda ka qaybqaata arriminta daryeelka caafimaadka habaysan ee isbitaalladeenna.

** Taxanahaan waxaa dhici karta in waqti ka waqti la baddalo, bacdama uu ururkeenna baddalmayo iyo korayo. Waxa aannu taxana casriyaysiin doonna ogaysiiska lagu lagu soo dhejinayo shabakadda internentka* ***healthpartners.com*** *iyo* ***parknicollet.com****.*

121804 (4/14)_2156